



Ilaha Kale

Inaad adeegsato qaybta raadinta ee Child Care Choices (Dookhyada Daryeelka Carruurta) ayaa ah kaliya talaabada koobaad shaqada raadinta daryeelka carruurta.; waxaa jiro khayraad kale oo aad u badan oo kaa caawinaaya raadintaada iyo gaarista go'aankaaga. Wuxaan heli kartaa xog ku saabsan:

- The Step ratings of Quality for ME (*Barnaamijka Cabbirka Tayada*), oo ah nidaamka qiimaynta iyo hormarinta tayada ee Maine;
- Liisaska hubinta si aad u adeegsato marka aad booqanayso barnaamijyada;
- Xog loogu talagalay qoysaska oo ku aadan hormarinta ilmaha iyo daryeelka carruurta qaba baahiyaha gaarka ah.

Daabacaadaan waxaa suurtagaliyay Deeqda Tirsigeedu yahay 90TP0028 ee Xafiiska Daryeelka Carruurta, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha ee Maraykanka. Waxyaabaha ku jira daabacaadda waxaa kaliya masuul ka ah qoraayaasha daliilna uma ahan fikradaha rasmiga ah ee Xafiiska Daryeelka Carruurta, Maamulka Carruurta iyo Qoysaska, Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha ee Maraykanka.



childcarechoices.me



**Khayraadkaaga ku
Aadan Raadinta
Daryeelka Carruurta
ood ka hesho gudaha
Maine**



Waa maxay Child Care Choices?

Child Care Choices waa isha xogta onlayinka ah ee Maine taasoo loo sameeyay inay qoysaska ka caawiso raadinta iyo xog ka helida dookhyadooda daryeelka Carruurta.

Waxaad adeegsan kartaa aalada raadinta si aad u raadiso daryeelka Carruurta kaasoo buuxinaaya baahiyaha qoyskaaga. Gudaha webseetka waxaad xog ka heli kartaa:

- Nooca daryeelka Carruurta ee ka jira Maine iyo khayraad kaa caawinaaya inaad doorato barnaamij ku haboon qoyskaaga
- *Quality for ME (Cabirka Tayada)*, oo ah nidaamka qiimaynta iyo hormarinta tayada ee Maine
- Xogta Ruqsad-siinta Daryeelka Carruurta
- Khayraad loogu talagalay qoysaska, ayna ku jiraan haddii aad u baahan tahay in lagaa caawiyo bixinta qarashka daryeelka Carruurta

Noocyada Daryeelka

Kuwaani waa noocyada barnaamijyada ku jira qaypta raadinta ee Child Care Choices:

Daryeelka carruurta ee Qoyska: Barnaamijyadaan ayaa ku shaqeeya guri gaar loo-leeyahay waxayna badanaa u shaqeeyaan carruur da'o kala duwan leh.

Xarunta daryeelka Carruurta: Barnaamijyadaan waxay ku shaqeeyaan xarun loogu talagalay daryeelka Carruurta. Carruurta ayaa badanaa loo qaybiyaa kooxo ayadoo laga eegaayo da'da loogu adeeggo xarumaha daryeelka Carruurta.

Dugsiyada Barbaarinta: Barnaamijyadaan waxay barnaamijo siyaan Carruurta muddo aan ka badnayn 3 saacadood maalin kasta. Dugsiyada Barbaarinta qaarkood ayaa baxsha daryeelka subixii iyo galabkii labadaba, laakiin Carruurta ayaa ka qaybgeli kara hal galin maalin kasta.

Head Start: Head Start waa barnaamij federaal ah kaasoo hormariya u diyaar garoowga dugsiga ee Carruurta da'doodu u dhaxayso kuwo markaas dhashay ilaa da'da shan sano jir kana soo jeeda qoysaska danyarta ah ayadoo kor loo qaadaayo fahankooda, bulshanimadooda, iyo kobaca dareenkooda. Head Start wuxuu adeegyo siyyaa Carruurta aan wali gaarin da'da dugsiga iyo qoysaskooda. Qaar badan oo kamid ah barnaamijka Head Start ayaa sidoo kale baxsha barnaamijka Early Head Start, kaasoo adeegyo siyya saqirada, ilmaha sadex jirada ah, haweenka urka leh iyo qoysaskooda kuwaasoo dakhligoodu kaooseeyo heerka fakhriga federaalka u dagsan. Barnaamijyada waxaa la bixin karaa maalinta oo dhan ama nus kamid ah maalinta.

Sida loo Raadsho

Qaypta xog raadinta ayaa kaa caawinaysa inaad ku baarto barnaamijyada:

- Nooca daryeelka (daryeelka carruurta ee Qoyska ama xarunta daryeelka carruurta);
- Ciwaanka goobtooda iyo badka ay kuu jiraan;
- Magaalada ama koodhka boostada;
- Step rating with *Quality for ME (Barnaamijka Cabirka Tayada)*;
- Da'aha Carruurta ay adeegyada siyaan.

Natiijooyinka ayaa lagu muujinaya jaantus iyo liis aad soo degsan karto oo ay ku jiraan:

- Magaca, ciwaanka, iyo nambarka taleefanka ee barnaamijka;
- Nooca barnaamijka iyo da'daha ay adeegyada siyaan;
- Step rating with *Quality for ME (Barnaamijka Cabirka Tayada)*;
- Tilmaamaha gaari wadista;
- Faahfaahinta ruqsadayda.

Haddii aad su'aalo ka qabto raadinta daryeelka Carruurtaada fadlan wac 1-877-6805866 si aad u la hadasho Waaxda Khayraadka iyo Isku xirka Daryeelka Carruurta ee Waaxda Caafimaadka iyo Adeegyada Dadwaynaha ee Maraykanka, Xafiiska Adeegyada Carruurta iyo Qoyska.

Nalasoo Xariir

Maine Roads to Quality Professional Development Network
childcarechoices@maine.edu

Nagusoo booqo webseetka:
<https://childcarechoices.me>

Nagala Soco Facebook:
facebook.com/childcarechoicesmaine